# Ma ku cusub tahay Iswiidhen?

Kolkaas waxaad fursad u haysataa inaad wax dheeraad ah ka barato habka ay bulshada Iswi-idhishku u shaqeyso!

Waxyaalaha ay koorsada Barashada bulshadu (Samhällsorientering) ka kooban tahay:
- In la yimaado Iswiidhen
- In la degganaado Iswiidhen
- In la isku filnaado oo horumar laga sameeyo iswiidhen
- Xuquuqda iyo waajibaadka qofka shakhsiga ah
- In reer lagu yeesho oo carruur lagu la noolaado Iswiidhen
- In saameyn lagu yeesho Iswiidhen
- In qofku ku daryeelo caafimaadkiisa Iswiidhen
- In lagu gaboobo Iswiidhen

Waxaad koorsada ku dhiganeysaa afkaaga hooyo ama af kale oo aad taqaan. Dhegeyso oo su'aalo weyddii, doodahana ka qaybqaado.

# Yaa ka qaybqaadan kara?

- Qofkaaga ku yimid qaraabo ahaan
- Qofka loo dejiyey qorshaha meeleynta

La xiriir maamulka degmada si aad u hesho warbixin dheeraad ah iyo warqadda codsiga.

# Wargelin!

Bogga www.informationsverige.se waa bar-kulan Internet oo loogu talagalay qofka ku cusub Iswiidhen. Waxaad halkaas ka akhrisan kartaa macluumaad ku saabsan bulshada Iswiidhen. Macluumaadkaasina waxay ku qoran yihiin afaf kala duwan.

*"Waxaan qabaa in koorsadu wax walba ku wanaagsan tahay. Waxaan ka helay warbixino aad muhiim iigu ahaa. Isla markaasna waxaa i sii farxad geliyey warbixinaha oo ku qornaa afkayga hooyo. Waxaan rajeynaa in ay warbixinahaasi noqdaan kuwo aan u isticmaali karo ku noolaans-haha Iswiidhen."*